



Ku soo dhawaada waalidiinta iyo ciyaartooyda ee Skoftebyns IF!



Waxaan nahay urur ka dhisan Trollhättan,
lehna hadaf ah in caruurta & dhallinyarada
la siiyo ciyaaraha firfircoonida xilliga
firaqada ee mecne leh.
Dhammaan waa la soo dhaweynayaa.

Si qof walba ugu raaxeysto naadigeena, waxaad u baahan tahay inaad raacdo xeerarkeenna guud. Faylkan waxaa ku jira macluumaad muhiim ah oo adiga xubin cusub ah.

Bixinta khidmada xubinnimada

Si aad uga ciyaarto kubadda cagta Skoftebyns IF waa inaad bixisaa khidmada xubinnimada. Dabcan waad ku tababarqaadaneynsaa dhowr jeer inta aadan lacagta bixin. Marka aad noqoto xubin fasaxa xagaaga kadib waxaad bixineysaa keliya kalabar khidmada xubinnimada.

Ka hel waxyaabaha aad u baahan tahay bogga internetka

Waxbixintoo idil waxay ku qoran tahay bogga internetka ee naadiga www.skoftebynsif.nu. Koox tababar walbaa waxay bog u gaar ah ku leedahay bogga internetka.

Akhri hab nadaamkeena

Xeerarka u degsan naadiga waxaa laga akhrisan karaa bogga internetka. Waa muhiim inaad la socoto waxa laga filanayo xubnaheena inay ku xiran tahay hadduu qofku yahay ciyaartooy, waalid ama hoggaamiye.

Buuxi foomka warbixinta cinwaanka

Naadigu wuxuu u baahan yahay cinwaanada xiriirka faahfaahsan ee ciyaartooy walba. Warbixinta cinwaanada waxaa lagu kaydineysaa diiwaanka xubnaha waxaana loo isticmaalayaa la xiriirka ciyaartooyga iyo ehelkiisa iyo qorista joogitaanka. (Lacagta firfircoonida – "aktivitetesstöd" waxay qayb muhiim ka tahay dhaqaalaha naadiga.)

Marka aad ku codsato inaad xubinnimada bogga internetka waxaa muhiim ah in aad u buuxiso warbixinadoo dhan si sax ah kadibna aad iska hubiso in warbixinta cusbooneysiiso. Warbixintaada shakhsiga waxaa loo xafidayaa sida ku cad xeerka difaaca macluumaadka.

Sameynta "saacadaha kooxda" Slusscaf et

Skoftebyns IF ayaa maamula maqaayadda Slusscaf et. Halkaana waxaa si iskaa wax u qabso ah uga shaqeyn kara dhowr jeer xilli ciyaareedkiiba kooxaha dhallinyarada iyo dadka waaweyn. Taa waxaan u naqaan in la sameeyo "saacadaha kooxda" (lagtimmar). Si looga qayb galo ciyaaraha tartanka iska horimaadyada waxay u baahan tahay in la qabto hawsha saacadaha kooxda.

Suuq geynta guud

Naadigu wuxuu leeyahay dhowr hawlo suuq geyn wadajir sanadkiiba. Si looga qayb galo ciyaaraha tartanka iska horimaadka waxay u baahan tahay in laga qayb galo hawlaha.

Lacagta waxay ku dhacaysaa khasnadda kooxda

Dhammaan kooxaha waxay leeyihiin khasnado kooxeed u gaar ah halkaasoo lacagaha kooxda iyo iibinta xirmooyinka bakhtiyaa nasiibka lagu kaydiyo. Lacagahaa waxaa loo adeegsadaa koobabka,kaamamka iwm.

Dharka naadiga

Dharka wata daabacaadda naadiga ayaa la dalban karaa oo la iibsan karaa dhowr jeer sanadkiiba. Xilliyada dalbashada noocyada waxaa lagu shaacinayaa bogga internetka. Qaar ka mid

ah badeecadaha la xushay ee ku jira buugga kataloogga ayaa laga iibsaa karaa sanadkii oo dhan dukaanka Stadium ee Överby.

Dhammaan waa loo baahan yahay!

Hoggaamiyeyaasheena hawlaha badigood ayagaba waa waalidiin dhalay ciyaartooy markaana wax magdhaw dhaqaale oo ay u helayaan hawshooda ma jirto. Waxaa intaa dheer ciyaaraha kubadda cagta waxaa jira waxyaabo badan oo laga qaban karo kooxda, tus. baakadaha bakhtiyaanasiibka , u wareejinta alaabaha tartamada ciyaaraha ,khasnadda kooxda, qalabka, bogga internetka ee kooxda iyo maqaayadda Sluscaféet. Markaa waxaan idinka codsaneynaa inaad gacan ka geysataan waxyaabaha aad u maleysaan inaad qaban kartaan. Qof walba wax yar buu qaban karaa!

***Waxaan rajeyneynaa inaad ku raaxeysan doontaan
la jirka Skoftebyns IF!***

